

Guddiga Doorashooyinka Oo Soo Saaray War Xumad-Jebin U Ah Walaac La Qabo Dibudhac Mar Kale Ku Yimaa

Thursday, 25 June 2009

Hargeysa(Geeska) - Guddiga doorashooyinka Qaranka ayaa shaaciyey inay Xukuumadda Somaliland bixisay 25% dhinaceeda laga doonayay dhaqaalaha ku baxaya doorashadda Madaxtooyada. Islamarkaana waxa ay rajo fiican ka muujiyey geedi-socodka iyo qabyo tirka diyaar-garowga doorashada.

Maal-mihii ugu danbeeyey-ba waxa soo baxayay walaaca Mucaaradka Somaliland ka qabaan dib u dhac mar kale ku yimaada doorashada loo qoondeeyey 27-ka bisha Septembe ee soo socota, iyadoo xukuumadda ku eedeeyey in ay ku jirto qorshayaal u go'gol xaadhaya muddo kordhin mar kale loo sameeyo Madaxweyne Rayaale. Xisbiyadda UCID iyo KULMIYE qodobada ay u cuskadeen eedooda waxa ka mid ahaa in xukuumadu ka baxday shuruudo deeq-bixiyayaashu ku xidheen dhaqaale 75% ah oo ay ku taageerayaan doorashadda Somaliland. Kuwaasoo ay ku jirtay in xukuumaddu shubto saamiga kaga soo hagaagay kharashka doorashada iyo in heshiis laga gaadho caqabadaha ka horeeya doorashada.

Komishanka Doorashooyinka Somaliland ayaa warsaxaafadeed uu shalay soo saaray ku shaaciyey in Xukuumadu Komishanka ku wareejisay saamigii kaga beegnaa dhaqaalaha ku baxaya doorashada.

Warsaxaafadeedkan oo uu ku saxeexanyahay Gudoomiyaha Gudiga doorashada Jaamac Maxamuud Cumar (Jaamac Sweden) waxa uu u dhignaa sidan: "Wadahadaladii u bilaabmay Axsaabta Qaranka ee 16-kii May ee lagu falanqeyay dhamaystirka hawlaha doorashada Madaxtooyada ee Somaliland waxaa ka dhashay heshiiskii Axsaabta Qaranka ee 27-kii May 2009-ka ee diyaargarowga doorashada Madaxtooyada.

Iyadoo heshiiskaa laga ambo qaadayo Komiishanka Qaranku waxay bilaabeen in xisbiyada qaranka ka wada shaqeeyaan dhamaystirka arrimaha soo socda.

1. Gudida farsamada ee diiwaangelintu waxay isku raaceen hawlgalka hab raaca dhamaystirka hawlaha serverka (parameters).
2. Waxa gebogebo taagan xeerkaa hab-dhaqanka axsaabta qaranka ee doorashada madaxtooyada.
3. Waxa la isla qaatay wixii galdaloolo sharci ah in loo sameeyo lifaaq wax-ka-bedel ee doorashooyinku 20/2001 iyo xeerka diiwaangelinta.
4. Waxa dhamaystirmay oo ay dawladu bixisay saamigii kharashka dawlada ee doorashada Madaxtooyada, oo lagu shubay xisaabta komiishanka taas oo dhan SL SH 7,200,000,000, uma dhiganta hal milyan oo Doolar.

5. Komiishanka Qaranku waxa uu dadwaynaha, Axaabta, dawlada ku baraarujinayaa in ay hareeraha iska taagaan. looga midho dhalin lahaa qabsoomida doorashada Madaxtooyada oo qabanqaabadeedii la guddo galay.”

Source: www.geeska.net, Wargeyska Geeska Afrika, Hargeysa